# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1039
# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS
# 2:9-17

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin. Isagoo hoga-tusaalaynaya masiixyiintii wakhtigiisa iyo weliba kuweenna maata nool, ayaa waxaa rasuuul Butros leeyahay, sida ku qoran isla Warqaddan kowaad cutubka 2:1-2, baalka 405 ee Axdiga Cusub, sidatan:

**"Haddaba sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan oo dhan, iyo khiyaano oo dhan, iyo laba-wejiilenimo, iyo xaasidnimo, iyo cay oo dhan, oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah,**

**si aad ugu kortaan xagga badbaadada."**
**SONG: REEL----CUT--------**

Markii noogu dambaysay waxaynu si qota dheer uga faalloonnay aayaddii siddeedaad. Waxaa aayaddaasu ay ka hadlaysaa dhagaxii kuwa wax dhisaa ay iska tuureen iyo sida ay ugu dhibtoodeen inay meeshiisii ku soo cleiyaan, kaddib markii ay arkeen in dhagaxii la tuuray, bilxaqiiqa uu ahaa madaxa rukunka ama macbudka. Waxaa markaa aynu soo gaarnay qidco ama aayad ka mid ah qorniinka taasoo muujinaysa in nolosha masiixinnimadu ay ku cabbiran tahay heerka Masiixa. Ilamaa aynu noloshaas oo kale ku noolaanno mooyaane, looma fadhiyo inaynu dreenno nolol masiixinnimo oo cadi ah.

Waxaanan caaway meeriska ka bilaabaynaa baalka 406 ee Axdiga Cusub, oo ah Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 2:9. Waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Laakiinse idinku waxaad tihiin jinsi la doortay, iyo wadaaddada boqorka, iyo quruun qoduus ah, iyo dad Ilaah iska leeyahay, inaad ogeysiisaan wanaagga kan gudcuka idiinka yeedhaay oo idiinku yeedhay xagga nuurkiisa yaabka leh."**

Wuxuu inagu leeyahay waxyaabo wanaagsan oo innaga ina khuseeya. Waxaynu nahay jinsi la doortay iyo wadaaddada boqorka, iyo quruun wada qoduus ah iyo dad Ilaah iska leeyahay, waxaynu nahay, waa kuwa masiixiyiinta ah e, dad aan la heli karin. Haddaba dadka Ilaah maahan inay noqdaan kuwa siyaabo kale u fakaraya, oo nooc kale ah, waxaa la doonayaa inay noqdaa **"Dadkiisa, ama Kuwo uu isagu iska leeyahay."** Marka kowaad, Waxaynu nahay **"Jinsi la doortay,"** Waana quruun la doortay. Waxaa ku qoran kitaabka

Axdigii Hore in Ilaah u doortay Israa'iil inay noqoto dadkiisa. oo markii la eego Qorniinka waxaa jira laba qolo ama quruun oo dad ah; qaranka Israa'iil, oo ah qarankii la doortay, iyo Kiniisadda oo ah iyaduna qaran la doortay ama jisi la doortay. Waxaad markaas maanka ku haysaa in imminka rasuul Butros warqaddan uu u qoray dad Yuhuud ah. Wuxuu warqaddan u qorayaa Yuhuuddii ku kala firirsanayd quruumihii ay xukumayeen reer Rooma.

Yuhuuddii masiixiyiinta ahaa waxay ku kala yaacsanaayeen boqortooyadii reer Rooma. Inkastoo aadan u muuqanin sida inaad ka mid tahay qaran ama jinsi la doortay haddana saaxiibkayga Masiixiga ahow, waxaad ka mid tahay jinsiga la doortay. Maaddaama aad Masiixa u timid, waxaad tahay ama laguugu yeerayaa jinsi la doortay.

Waxaana la mid tahay reer binu Israa'iil, oo iyaguba la doortay. Furaha boqortooyada waxaa la siiyey kiniisadda, oo innaguna maanta waa inaynu dadka gaarsiinno Injiilka waayo kiniiadda waa tan la doortay oo makrii aynu kiniisadda ka mid nahay innana waa layna doortay. Waxaana darajada **"jinsiga la doortay"** lagu gaaraa rumaysadka Masiixa.

Waxaa markaas ay u muuqataa in masiixiyiintu ay haystaan ama qoorta u suran tahay billad wanaagsan oo lagu qoray: **"Idinku waxaad tihiin jinsi la doortay iyo quruun qoduus ah."** Haddaba waxaa socda been-abuur fara badan oo qoomiyadaha qaar lagu sheegayo inay ka mid yihiin qaar ka mid ah tobankii qabiil ee Israa'iil ee lumay. Waxaa lagu sheegyaa in qoomiyadahaasu ay ka mid yihiin Gypsiga, qolo

kale oo la yiraahdo Mormons, Seven Day Adventist iyo kooxda loo yaqaanno Britis-Israa'il, oo ah tan ugu codka dheer. Haddaba haddii dadka qaar ay ku doodaan toboankii qabiil ee lumay ayaa waxay deggan yihiin Ingriiska iyo Maraykanka, ayaa suaasha soo baxaysa waxay noqonaysaa maxaa lagu caddaynayaa. Ilaah gees buu isaga dhigay qaaranka Israa'iil, Ilaahna maanta wuxuu samaynayaa waxyaabo cusub.

Wuxuu isugu yeerayaa, jinsi la doortay, iyo dad quduus ah oo ka kala imanaya quruun waliba oo dunida ku nool, ha ahaadeen Yuhuud ama kuwa aan Yuhuudda ahayne. Waxaana iyaga oo dhaniba yeesheen xiriir cusub oo ay Ilaah ku gaaraan, oo waxaana taabbagelinaya kiniisadda Masiixa. Inkastoo aniga iyo adiga aynu ku doodno inaan u nimid Masiixa, haddana Masiixu wuxuu leeyahay, aniga ayaa idin doortay.

Waxa Sayid Ciise Masiix ku leeyahay rasuullada sida ku qoran Injiilka sida Yooxnaaa u qoray 15:16, markaasoo uu lahaa: **"Idinku ima aydnaan dooran, laakiinse anaa idin doortay......"** Haddaba waa wax wanaagsan inaan garanno in Masiixu horey inoo doortay, oo masuu'iyadduna waxay saaran tahay Masiixa, waayo anigu isagaan leeyahay.

Miyaanay wanaagsanayn in Masiixu horey inoo doortay, oo aanay ahayn wax qalbi-qaboojin u keenaya niyadaheenna. Tan labaad ee aayadda kore laynoogu sheegay ayaa waxay tahay, in innagu aynu nahay **"Wadaaddada boqorka,"** Ilaah wuxuu beri hore doortay reer binu Israa'iil oo dhan inay u noqdaan isaga qaran wada wadaaddo ah. Waxaan markaas rumaysanahay in dhammaadka sabanka ay reer binu Israa'iil oo dhan

noqon doonoon qaran wada wadaaddo ah. Habase yeeshee kal hore reer binu Israa'iil way dembaabeen, markaasaa laah kala soo dhex baxay hal qabiil. Wadaad-dada reer binu Israa'iil waxay ka yimaadaan hal qabiil. Maanta lama hayo wadaadnimo Ilaah aqoonsan yahay oo aan ka ahayn wadaaddada Masiixa. Waana kuwa keliya ee Ilaah aqoonsan yahay. Reer binu Israa'iil waxay lahaan jireen wadaaddo, laakiin kiniisadda ayaa imminka waxay leedahay wadaadnimada. Innaga oo dhan waxaynu nahay wadaaddo caadi ah oo Ilaah u siman.

Maaddaama aynu Masiixa leenanahay, waxaannu soo hor istaagi karnaa jaahiisa. Simon Butrosna wuxuu inoo sheegayaa, in innaga ah rumaystayaasha masiixa inaynu nahay wadaaddo boqorro ah. Waxaannu innaga oo dhan nahay carruurta boqorka. Wakhti ka hor waxaannu qorniinka idiinka akhrinnay, waa intaynaan bilaabin warqaddan rasuul Butros e, in indhaha Rabbigu ay u furan yihiin kuwa xaqa ah, oo uu maqlo baryadooda. War miyaanay taasu ahayn wax la yaab leh oo wanaagsan?

Weli waxaan ku jirnaa faallada aayadda 9aad, waxaanan eegaynaa arrinka saddexaad ee looga hadlay oo ah in aynu nahay kuweenna masiixyiinta ah, **"Quruun qoduus ah."** Reer binu Israa'iil markii la eego sidii ay u dhaqmayeen, lagumam tilmaami karin kuwo qoduus ah, oo welibana kiniisaddu waa la mid. Dhicitaankii reer binu Israa'iil bannaankuu yaallay, oo qof waliba wuu arki karay, dhicitaanka kiniisadduna meelo meelo ayey iyaduna khalad ka samaysay, habase yeeshee waxaannu qoduus ku noqonaynaa xiriirka aynu la leennahay Masiixa,

waayo Masiixu waa xaqnimadeenna. Haddii midiin Ilaah hor joogo, maahan adiga waxa keenaya xaqnimada ama qoduusnimada, laakiin waa Masiixa. Haddaba waannu xaq ku noqonaynaa Masiixa. Markaa waxaannu helaynaa farxad joogto ah inaynu qayb ka noqonno quruuntan qoduuska ah, waana qaran cusub oo dunida maanta ku nool. Tan afraad ee aayadda 9aad laynoogu soo sheegay ayaa waxay tahay in innagu aynu nahay,

**"Dad Ilaah iska leeyahay".**

Maahan in ay qaran yihiin oo keliya laakiin welibana waxaa jira dad cusub oo maalinba maalinta ka dambaysa kiniisadda ku soo biiraya. Innaga oo dhamina waxaynu nahay dadkiisa. Markii Masiixu dhiiggiisii qaaliga ah bixiyey, oo uu soo dhammeeyey hawshiisii furashada ee u baahnayd dhiig-daadinta, ayuu wuxuu imminka helay dad isaga u gaar ah ama khaas ah, oo sidaas ayuu ku yeeshay Masiixyiinta isaa ku kalsonaaday. Sayid Ciise Masiix oo Ilaah baryaya ayaa wuxuu leeyahay sida ku qorna Injiilka sida Yooxanaa u qoray 17:6, oo leh:

**"Magacaagaan u muujiyey dadkii aad dunida iga siisay. Kuwaagii bay ahaayeen, oo anaad i siisay, iyaguna hadalkaagay xajyeen."**

Mar kale ayaa haddana leeyahay Masiixu sida ku qoran isla Injiilka sida Yooxanaa u qoray 6:37, sidatan:

**"Dhammaan wuxuu Aabbuhu i siiyo way iman doonaan, oo kii ii yimaadana ma eryi doono."**

War maxay wanaagsan tahay in Ilaah inagu wareejiyey Masiixa. Wuxuuna ugu yeerayaa kuwiisii. Welibana Ilaah maanta adiga qudhaada ayuu u yeerayaa, iyadoo aan la eegayn qoomiyadda iyo qabiilka aad ka soo jeeddo, wuxuuna doonayaa inaad noqoto kuwiisa.

Wuxuu doonayaa inaad ku soo biirto qaarankan ama jinsigan la doortay ee ah wadaaddada boqorka. Maahan inuu kuugu casumayo inaad suun boqortooyo xirato, laakiin wuxuu kuugu yeerayaa inaad isaga hor timaaddo. Wuxuuna doonayaa inaad ka mid noqoto qaranka qoduuska ah, oo ah kiniisaddiisa. Waxaad ka mid noqonaysaa ururkaas ka kala yimid yinida, oow axaad yeelanaysaa Masiixa.

Waxaanad dareemaysaa isla sidii Sabuurluhu dareemay markii uu lahaa:

"Waxaa farxsan quruunta Ilaahooda yahay Rabbbiga, sida ku qoran Sabuurka 144:15. Mar kale ayaa Sabuurluhu leeyahay sida ku qoran Sabuurka 79:13, Waxaana qoran sidatan: **"Innagu waxaynu nahay dadkaagii iyo idihii daaqsintaada."** Waxaa kaloo nebi Ishacyaah leeyahay, sida ku qoran cutubka 53aad aayadd siddeedaad sidatan:

**"...Isaga dulmi iyo xukun baa lagu sii qaaday. Haddaba bal yaa qarnigiisii ka mid ahaa oo u maleeyey in isaga laga gooyey dalkii kuwa nool? Xadgudubka dadkayga daraaddiis ayaa isaga loo garaacay."** Waxaa kitaabak Axdiga Cusub laynoogu sheegayaa sidatan ku qoran Warqaddii Cibraaniyada 13:12, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Sidaas daraaddeed Ciisena si uu dadka qoduus ugaga dhigo dhiiggiisa wuxuu ku xanuunsaday iridda dibaddeeda."** Haddaan dib ugu soo noqonno meeriska cutubka 2aad ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 10aad ee Warqaddii kowaad ee rasuul Butros, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Idinku waagii hore dad ma aydin ahayn, laakiinse haatan waxaad tihiin dadka Ilaah, idinku markii hore**

**naxariis ma aydin helin, laakiinse haatan naxariis baad hesheen."**

Wuxuu qorniinku leeyahay, kolkoo hore dad ma aydin ahayn. Haddaba innagu ma ahayn kuwii Ilaah, oo waynu ka soocnayn, waayo waxaynu ahayn dembiileyaal. Welibana naxariis ma aynaan helin, oo rsuulku wuxuu leeyahay, **"Idinku markii hore naxariis ma aydin helin."** Markaa haatan waxaa jira hadiyad dadku leeyahay, oo aydaan doonayn inaad lumisaan, waxaana weeye naxariista Ilaah.

Ilaahna wuxuu hodan ka yahay naxariista. Haddii aad wax naxariis ah u baahan tahay, Ilaah weyddiiso, waayo ku guul-darraysan maysid inaad seegto naxariistiisa. Waxaa markaas laynaga doonayaa inaynu maanka ku hayno in rasuul Butros la hadlayey Yuhuuddii dibadda ku kala firirsanayd, waana dadkiisa kuwaasoo ku noolaa qaramadii reer Rooma ay xukumayeen.

Waxaana dadkaasu badankood ay diideen in Masiixu yahay kii la doortay, markaasaa Ilaahna iyagii diiday. Balse kuwii Rabbiga soo raacay waxay yeesheen ama aqbalay Ilaah, oo wuxuu rasuulku leeyahay, **"...laakiinse haatan idinku waxaad tihiin dadkii Ilaah."** Ilaah wuxuu samaynayaa waxyaabo cusub imminka, oo wuxuu u yeerayaa dad uu ugu yeeray kuwiisa, oo wuxuu u fidinayaa dadka oo dhan naxriis. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 2aad ee Warqadan kowaad ee rasuul Butros, ayaa waxaa qorniinku leeyahay sidatan:

**"Gacaliyayaalow, waxaan idiin baryayaa, idinkoo ah sidii qariib iyo dad sodcaal ah, inaad ka fogataan damacyada jidhka oo nafta la dagaallama."**

Haddaba qofka Ilaah ka baqa waa inuu Ilaah aad iyo aad u ammaano. Sidee buu Ilaah ku ammaanayaa? Wuxuu ku ammaanayaa isagoo qasiiddooyin ku ammaana, oo haddii uu yahay nin mu'allif ahna uu curiyo qasiiddooyin. Waa hagaag, waa khasab in sidaas la yeelo, waxaa kaloo Ilaah lagu ammaani karaa in shuqullada jidhka laga leexdo. Waxaa rasuul Butros horey inoogu soo sheegay caawaqibka shuqulka jidhka, oo wuxuu leeyahay:

**"Haddaba sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan oo dhan, iyo khiyaano oo dhan, iyo laba-wejiilenimo, iyo xaasidnimo, iyo cay oo dhan, oo sida carruur dhallaan ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah, si aad ugu kortaan xagga badbaadada."**

Dabiicaddeenna ma qaabayn doonto shuqulka jidhka laakiin waxaa qaabaynaya Hadallada Ilaah. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka 2aad waxaanan idiin akhriyeynaa aayadda 12aad, oo wuxuu qorniinku leeyahay sidatan:

**"Quruumaha dhexdooda dabiicad wanaagsan ku dhaqma, in meeshii ay wax xun idinkaga sheegi lahaayeen sidii idinkoo ah kuwo xumaan fala, ay shuqulladiinna wanaagsan oo ay arkaan Ilaah ku ammaanaan maalinta booqashada."**

Wuxuu rasuulku leeyahay, **"Quruumaha dhexdooda dabiicad wanaagsan ku dhaqma."** Haddaba sidaad arkayso masiixiyiinta dhabta ah inay dunida iyo waxyaalaheeda ka dhaqaaqaan uma qaataan wax layska yeelyeelayo. Mana ahan in masiixyiintu ay ka gaabiyaan daacadnimada iyo shuqullada wanaagsan ee ay dadka dhexdiisa ku samaynayaan. Waa wax wanaagsan, waana wax ay Masiixiyiintu ku

ammaanayaan Ilaaho.

Sidaas ayey Ilaah ugu markhaati-furi karaan iyagoo jooga dunida. Haddaan meeriska cutubka 2aad halkii idiinka sii wadno ayaannu dhegaystayaal imminka idiin akhriyeynaa aayadaha 13-14, waxaana Qorniinku qodduuska ahi leeyahay sidatan:

**"Rabbiga daraaddiis u addeeca amar kasta oo dadka, ama ha ahaado boqorka ka sarreeya dadka oo dhan, amase taliyayaasha uu isagu u soo diray inay ka aargudaan kuwa xumaanta sameeya oo ay ammaanaan kuwa samaanta fala."**

Marka taladan rasuulku siinayo Masiixiyintii Yuhuudda ahayd ee ku kala firirsanayd embaraadooriyaddii reer Rooma ayaa waxaa xukunka qabsanayey ninkii waalnaa ee la oran jiray Nero. Dadka reer Rooma waxay imminka ku faanaan inay dunida u keeneen garsoorka iyo caddaaladda. Haddaba dawlad waliba waxay dadka dhex keentaa garsoor iyo caddaalad si loo kala dambeeyo, oo aan laysugu xad-gudbin.

Habase yeeshee caddaaladda iyo garsoorka aadmiga wuxuu u samaysan yahay inuu ku jiifsado ninka miskiinka ah. Ninka tujaarka ah wuxuu heli karaa mar waliba inuu qabsado wakiil, kuwaasoo xariif ku ah sidii ay caddaalad u siiyaan kuwa xumaanta falay, oo welibana ay uga eexdaan masaakiinta.

Mar waliba kan miskiinka ah ayaa sharcigu eryadaa. Haddaba waa sidee sida qofka muuminka ah uu ula macaamiloonayo sharciga? Waxaa laga doonayaa qofka muuminka ah inuu sharciga ama qaynuunka waddanka u yaal addeeco. Taasina waa waa rasuul Butos halkan inoogu sheegay marka uu lahaa:

**"Rabbiga daraaddiis u addeeca amar kasta oo dadka."** Maaddaama waagaas ay ku hoos jiraan sharcigii reer Rooma ay aa masiixyiintii dhulkaas ku kala firidhsanayd laga doonayaa inay addeecaan sharcigii reer Rooma. Inkastoo reer Rooma ay daninayeen in sharcigoodu yahay sharci ku dhisan caddaalad, haddana sharcigoodu mid caddaaladda ku salaysan laguma sheegi karin.

Xusuuso in isla sharcigii reer Rooma lagu deldelay Sayid Ciise Masiix, oo welibana masiixyiintii hore waxaa lagu xasuuqay isla sharcigaas, welibana reer Rooam awaxay leeyihiin waxay dadka bareen ama u keeneen garsoor hagaagsan. Waxba ma dhaamaan quruumo waa-weyn oo maanta nool, kuwaasoo masiixinni-mada si hoosaysa oo aan muuqan ula dagaallamaya.

Haddaba masiixyiintu ma fallaago ka soo horjeedda xukuumadda baa? Maya, waayo qofka Masiixiga ah wxaa laga doonayaa inuu addeeco sharciga iyo kala dambaynta. Weli meeriska cutubka 2aad ayaannu ku jirnaaye, waxaannu imminka idiin kahriyeynaa aayadda 15aad, waxaana qorniinka Qoduuska ahi leeyahay sidatan:

**"Waayo, Ilaah doonistiisu waxaa weeye inaad samafalid ku aamusisaan jaahilnimada nacaysyada."** Waxaa halkan aynu ka ogaanaynaa haddii qof masiixi ah isku dhiibo dawladda iyo kuwa amarka leh, wuxuu ficilkiisa ku muujinayaa inuu Ilaah darajaynayo, oo uu ku ammaanayo noloshiisa. Nin waliba ee Masiixi ah haddii dawladdu ay cashuur ku soo rogto, inkastoo uusan si farxad leh ku aqbalin, haddana wuxuu jecel yahay inuu u hoggaansamo.

Haddaba innagu waa inaynu sharciga daacad u ahaanno, oo sidaas ayaannu Masiixa ugu markhaati-furaynaa. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 2aad ayaannu imminka idiin akhriyeynaa Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 2:16, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Idinkoo xor ah oo aan xorriyaddiinna ugu isticmaalayn sidii jubad aad xumaanta ku qarisaan, laakiinse sidii idinkoo ah addoommo Ilaah."**

Haddaba xiriirka masiixyiinta dhexdooda ka jira ayaa wuxuu noqonayaa markhaati shaqeeya oo ka dheereeya ama ka wanagsan khudbadaha Axadda. Sida aad arkayso, qofka rumaystaha ah ee Masiixa ku jira wuxuu leeyahay xorriyad aanu haysanin kan Masiixa bannaanka ka jooga. Waxaa jira waxyaabo duruuftu ay ii saamayxayso oo aan samayn karo.

Habase yeeshee aanan u samaynaynin si aanan u quursan qofka walaalka ah ee aniga ila jira ama igu deegaanka ah, waanan ka leexanayaa. Markaa dooni maayo inaan xorriyaddayda u isticmaalo inaan xumaan ku sameeyo; si markaa walaalkii kale ee Masiixa ku korayey qudhiisu ula argaggoxo waxa aan samaynayo. Markaa waa inaynu xusuusanno, inkasto aynu xor nahay, in haddana aynu nahay addoommada Rabbiga.

Weli waxaannu ku jirnaa dhegaystayaal meeriska cutubka labaad ee Warqaddii kowaad ee rasuul Bturos, waxaanan haatan idiin akhriyeynaa aayadda 17aad, oow axaa Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Dadka oo dhan maamuusa, walaalahana jeclaada, Ilaahna ka cabsada, oo boqorka ciseeya."**

Inaan dadka oo dhan xisayno waxa ka mid tahay markhaati-furkayaga masiixi-nnimo. Qofka Masiixiga

ah waa khasab inuu xushmeeyo, dadka oo dhan, oo aynu weliba jeclaanno walaalaha, oo loo jeedo rumaystayaasha kale. Waxaa soo raacaya taas, inaannu Ilaah ka cabsanno. Weliba kuweenna masiixiyiinta ah ayaa la doonayaa in noloshayada ay ka muuqato inaynu nahay kuwo Ilaah ka cabsada oo darajeeya.

**SONG: REEL----CUT--------**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin